

FINLAND HAL LAMBAR OO KALIYA AYAA LAGA HELAA GURMADKA DEGDEGGA AH WAANA 112

SIDAN U DHAQAN:

MA XAALAD KADIS AH GURMAD DEGDEG AH U BAAHAN AYAA KULA DARISTAY? – WAC 112 – KA JAWAAB SU'AALAHA.

Gurmadka degdegga marka lagaa qabto waxaa lagu jawaabaa "Hätäkeskus - Nödcentralen"

Waxaa gurmadka degdegga ah la wacaa oo kaliya marka lagu jiro xaalad gurmadka sarkaalada dowladda anan lagaga maarmaynin. Finland lambarka gurmadka degdegga ah waxaa ka jawaabaya sarkaal ka shaqeeya amniga oo loo tababaray howshaas.

Lambarka gurmadka degdegga ah waxaa kaloo laga soo wici karaa taleefan uunan ku jirin sim kaar ama layn taleefan oo waddamada dibadda ah oo anan lahayn lambarka nawaaxiga.

Waajibka gurmadka degdegga ah ee Finland waa in laguugu adeego af finnish iyo af iswidhish. Luqadaha kale heegankooda ayaa kuu qaban kara adeegga turjubaanka oo markaas qofka soo wactamayaa waa in uu waxyar laynka ku jiraa inta turjubaanka la helayo.

Soo wac lambarka gurmadka degdegga ah ee 112 markaad ku jirto xaalad gurmud u baahan oo kadis ah

- markaad ogtahay ama ad ka shikisantahay inay jirto khatar ku sugan naf, caafimaad, hanti ama deegaanka
- marka ad rabto in aad ogaysiiso booliska fal dambi ah oo la wado wakhtigaas ama
- marka ad si degdeg ah ugu baahantahay daryeel caafimaad oo degdeg ah, booliska, dabdamiska ama heeganka sooshalka ad uga baahantaahay

Haddii si khalidan ama ku tagrofal leh loo isticmaalo lambarka gurmadka degdegga ah, ciqaab ayaa lagu mutaysan karaa. Soo wacitaanka anan baahida dhabta ah loo qabin wuxuu hakad galin karaa qof baahi dhab ah qaba inuu helo gurmud ama daryeel oo taasi ay keento dhibaato aad u culus inay gaadho. Haddii anad hubin in xaaladdaadu gurmadka degdeg ah u baahantahay iyo in kale, soo wac markaas labmarka gurmud degdegga ah ee 112. Adigu soo wac lambarka gurmudka degdegga ah haddii ad awoodayso. Qof kale haddii uu kuu soo waco waxaa macquul ah in helidda caawimaaddu ay dib kaaga dhacdo.

Xarunta gurmudka degdegga ah iimaylada ay leeyihiin laguma diri karo ogaysiis gurmud degdeg ah u baahan.

Ha soo wicin lambarka gurmudka degdegga ah ee 112

- haddii ad rabto su'aalo in aad waydiiso ama ad u baahantahay inaad wax ogaato
- xaalado khalkhal ah marka ay jiraan, ee qofna uunan halis naf ah ku jirin
- xaalado anan kadis ahayn haddii ay jiraan

Adeegyada kale xarumaha gurmada degdegga ah

Ogaysiiska gurmada degdegga ah waxaa Finland lagu samayn karaa xataa farriin qoraal ah. Adeegga farriimaha gurmada degdegga ah wuxuu ku shaqeeyaa af finnish iyo af iswidhish. Adeeggu wuxuu u baahanyahay in si gaar ah la iskaga diwaangaliyo. Hagitaanka isdiwaangalinta waxaad ka heli kartaa cinwaanka 112.fi isaga oo af finnish iyo af iswidhish ah.

Aaladda 112 ayaa ku caawinaya

Xarunta gurmada degdegga ah ayaa soo saaraya aalad 112 Finland la yidhaahdo, oo lagaga soo dajisan karo tukaamadda aaladaha laga soo dajisto ee laga iibsado isaga oo bilaa lacag ah. Aaladdu waxaay leedahay saddex luqadood: af finnish, af iswidhish iyo af ingiriis.

Marka taleefan gurmada degdegga ah loogu baahanyahay laga soo waco aaladda, goobta ad ku sugantahay si toos ah ayaay ugu dhacdaa xarunta gurmada degdegga ah. Waxaay dadajisaa falanqaynta taleefanada gurmada degdegga ah waxaana lagu ogaadaa meesha ugu dhow ee gurmada lagu hagayo.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xarunta gurmada degdegga ah waxaad ka heli kartaa 112.fi iyadoo af finnish, af iswidhish iyo af ingiriis ku qoran.

112

